**Amarka L. 13 rep**

**Xeerka Nidaamka samaynta caymisyada gaarka.**

**MAAMULKA WASAAYADDA TALYAANIGA EE SOOMAALIYA**

**MAAMULAHA**

Marka uu arakay Dekereetada Madaxweynaha Jamhuuriyadda Soomaaliya 9 Disember 1952, lamba. 2357;

**WUXUU AMAR KU SOO SAARAYAA**

Marka uugarowsaday baahida loo qabo in la soo saaro xeer lagu nidaaminayo hawgallada caymiska Dalka dhexdiisa;

Marka uu arkay qod. 1ee Amarka lamba. 28 rep ee taariikhda 23 Dicember 1951; Marka uu arkay qod. 1 ee Bayanka Mabaadiida Dastuuriga ee ku lifaaqan Heshiiska Ilaalinta Dalka Soomaaliya ee hoos taga Talyaniga;

Marka uu arkay qod. 8 ee Heshiiska Ilaalinta Dhulka Soomaaliya ee hoos taga Talyaaniga;

Marka uu arkay Dekereetada Madaxweynaha Talyaaniga ee taariikhda 9 Disember 1951, lamba. 2357; la ansixiyay isla maalintaas.

Muqdisho, 28 Juun 1952;

**WUXUU AMAR KU SOO SAARAYAA**

Waxaa la meelmariyay Amarka lifaaqaq ku saabsan ee adeegsiga hawlgallada caymiska Dalka Soomaaliya , la ansixiyay isla maalintaas.

Muqdisho, 28 Juun 1953.

Maamulaha

**E. Martino**

La hubiyay iyo lagu diwaangaliyay lamba. 1207 R. D.

## CINWAANKA IAAD

## XEERKA NIDAAMKA SAMAYNTA CAYMISYADA GAARKA EE SOOMAALIYA

### Qod. 1
### Xeerar Hordhaca

Xeerkaan waxaa lagu dhaqayaa dhammaan ururo-hantiedka soomaalida, talyaniga iyo kuwa dibadda, oo sikastaba la dhisay, oo qabanaya:

a) farsamada caymisyada laan kasta iyo qaab kasta;
b) farsamada caymisyada. Waxaa kaloo lagu dhaqayaa qodobada Xeerkaan oo

nidaaminaya samaynta caymisyada nolosha, wakaaladaha u xilsaaran waajibka lagu bixinayo raasamaalka sanadlaha oo u dhigma qaaraanka lagu bixiyo heshiis la xariira nolosha kuwa dhab ahaan ku jira caymiska, iyo sidoo kale wakaaladaha shaqadoodu ay tahay in ay shubaan lacago muddo sanooyin badan dib loo dhigay ama in ay dhiibaan cinwaano keenaya xaqa la soo sheegay iyadoo la bixinayo lacagta ama qaaraanka amase wareejinta waxqabad kale.

Dhaqangalka qodobada ku jira Amarkaan caymisyada Soomaaliya ay ku galeen ururo-hantiyed soomaali ah ama wakillo urur-haniyeed talyaani ah waa in ay ku jiraan santuuqa (portafoglio) soomaalida.

Sidoo kale waa in ay ku jiraan santuuqa soomaalida caymisyada ay ku galeen dibadda ururo-hantiedka lagu soo sheegay faqradda sare marka Soomalia lagu fulin karo.

**Qod. 2**

Qodobada amarkaan laguma dabbaqi karo:

a) Wakaaldda Caymiska Babaddada Soomaalia;

b) shirkadaha gurmadka wadaagga, ee aan lahayn ulajeeeddo kasab-doon ah, oo u ballanqaadaya shuraakadooda rasmaal aan ka badnayn 10.000 sh. som. Ama sanadle aan ka badnayn 400 sh. Som.;

c) Maamulka Dawladda iyo ururo-hantiyeedka gaarka loo leeyahay haddii ay toos u bixiyaan dhaqaalaynta nasashda ama hawlgabka amase caawinaadda haddii dhimasho ay ku timaaddo shaqaalahooda;

d) Wakaaladaha caymiska ee sharciyan la aqoonsanyahay;

e) shirkadaha iyo wakaaladaha reebitaankooda uu ku soo arooray xeerar gaara.

**Qod. 3**

Shirkadaha magac wadaagga ah ee shaqsiga iyo dammaanadda xaddidan, iyado qofka keligiis ay ka reebantahay in uu ku shaqeeyo caymisyada, marka laga reebo qandaraaslayada la xariira nolasha adanaha sida ku cad qodobada 1872 iyo kuwa ku sii xiga ee Xeerka Madaniga. Waxaa kaloo Soomaaliya ka reeban hawlaha caymissyada nafta ee abaalmarinta dabiiciga ah, caymiska nooca tontine ama dib u-qaybsiga. Waxaa kaloo reeban in Soomaaliya laga sameeyo shirkado soo bandhiga caymis si gaara dibaadda ka shaqeeya.

## CINWAANKA 2AAD
## Caymiska Nolosha Qofka Aadanaha

### Cutubka 1aad

**Qod. 4**

Caymiska qofka inta uu noolyahay waxaa qabanaya ururo-hantiyeed soomaali, talyaani oo loo oggolaaday si waafaqsan Amarkaan.

**Qod. 5**

Lacagta laga doonayo la-caymiyaha oo la siinayo qandaraaslaha iyo kan kaa faaidaystaha laguma samayn karo dacwado fulin ama xajisaad.

Waxa jira marka laga soo tago, lacagaha abaalgudka la baxshay, qaraarada ku saabsan ka noqoshada waxyaabihii la sameeyay ee wax u dhibaya daynlayaasha iyo kuwa ku saabsan hibada tarikada ku jirta, sheegashada daynta iyo yaraynta hibooyinka.

**Qod. 6**

Ururo-hantiedka soomaalida ee doonaya in ay samaystaan farsamada caymisyada iyo camisyada qofk nolashiisa oo dhan, ururo hantiedka talyaaniga ee dibadda si ay uga shaqeeyaan soommaliya caymisyada iyo sii-cayminta laamaha la soo sheegay ee doonaya in ay dalka ka samaystaan wakiilo sharci waa in marka hore ay helaan oggolaasho.

Oggolaashaha waxaa lagu bixinayaa dekereeto Maamulaha oo lagu baahiyo Faafinta Rasmiga ee Soomaaliya, kadib marka uu dhagaysto guddiga la-talinta ee uu guddoomiye u yahay Madaxa Xaafiiska Warshadaha, Ganacsiga Gudaha iyo Shaqada oo ka kooban xubnaha hoos ku qoran oo sanadkasta uu magacaabo Maamulaha:

a) wakiil ka socda Arrimaha Garsoorka iyo Xeer-dejinta;
b) wakiil ka socda Arrimaha Maaliyadda;
c) wakiil ka socda Arrimaha Gudaha;
d) laba wakiil oo ay soo magacaabaan Golaha Dalka oo ka wakiil shacabka Soomaaliya;
e) laba wakiil oo ka socda ururo-hantiedka gaarka oo ka shaqeeya farsamada caymisyada Soomaaliya, oo ay soo magacaaban Golaha Dhaqaalaha;
f) wakiil ka socda shaqaalaha ururo-hantieedka caymisyada, oo ay so magacaaban Golaha Dhaqaalaha;
g) wakiil ka socda Rugta Ganacsiga.

Oggolaashaha la soo sheegay waxaa la saaraya canshuurta ruqsadda dawladeed.

**Qod. 7**

Si loo helo oggolaashaha lagu qabanayo caymisyada ama caymisyada nafta aadanaha inta uu noolyahay, ururo-hantiyeedka soomaalida waa in ay u gudbiyaan Xaafiiska Warshadaha, Ganacsiga Gudaha iyo Shaqada codsi iyago bixinaya:

1) caddaynta ah in ay si sharci u dhisanyihiin iyo in ay haystaan, haddii ay yiihiin shirkadaha saamailayda, xitaa qaabka iskaashatada, raasamaalka saamiyada waa in aanu ka yareyn hal milyan Sh. Som, kaaso dhammaantii la soo wada shubi karo, amase haddii uu yahay urur caymiska wadaagga, lacag dammaanad leh oo aan ka yareyn lacagta la soo sheegay;
2) caddayn ah in uu dhigay Bangiga Talyaaniga, laanta Muqdisho lacag dhan 500.000 Sh. Som. tiro ahaan;
3) xogta ka kooban saldhigyada farsamo ee shaxda dhimashada iyo naafonimada iyo dulsaarka caqligalka la adeegsanayo si loo xisaabiyo abaalgudyada/lacagta caymiska iyo keyd xisaabeedka.
4) haddii ay yihiin abalgudyo saafi ah ama abaalgudyo duuduuba;
5) shuruudaha caymiska ee ku saabasan noocyada kala duwan ee heshiisyada. Shuruudaha la soo sheegay iyo camisyada laamaha nafta waa in ay la socdaan xitaa shuruucda la xariirta yareynta madax furashada.

**Qod. 8**

Ururo-hantiyeedka talyaaniga ee dibadda ee doonaya in ay ka samaystaan Soomaaliya caymisyo ama caymisyada nafta, si ay u helaan oggolaashaha, iyo ka sokow inay gutaan arrimaha ku qoran qod. 7 waa in ay:

a) u soo magacaabaan, iyagoo raacaya qaabka lagu soo xusay qod. 2500 ee Xeerka Madaniga wakiil guud ee Soomaaliya oo deggan Soomaaliya, iyagoo si cad u aqoonsan iqtiyaarka ah in uu Soomaaliya wakiil uga noqdaan ururo-hantiyedka garsoorka iyo dhammaan masuulinta Soomaalia hortooda, in uu galo iyo saxiixo heshiisyo iyo dokumentiyada kale e caymisyada lagu qabto Soomaaliya, in uu qabto hawgallada lagama maarmaanka u ah dhismaha iyo xaddidaadda curaarta dammanadda ah ee Xeerkano qorayo.
b) ka tanasulo hawlihii caymiska nafta ee uu si joogta ah u qabanayay dalkiisa hooyo ugu yaraan 10 sano.
c) bixiyo dokumenti kasta ee uu weydiisto Xaafiiska Warshadaha, Gancsiga Gudaha iyo

Shaqada.

Shuruudaha guud iyo kuwa gaarka ee heshiisyada caymisyada iyo lifaaqyada la xariira waa in lagu qoraa afafka talyaaniga iyo carabiga.

Oggolaashaha uruuro-hantiyeedka dibadda lama siinayo haddii Dawladaha ay ka tirsanyihiin ururo-hantiyeedka la soo sheegay aanay u oggolaan ururo-hantiyeedka Soomaalida macaamilka aan ka hoosayn midka la siinayo ururo-hantiyeedka Dawladda lala maacaamilo mid ka wanagsan.

Xaafiiska Warshadaha, Ganacsiga Gudaha iyo Shaqada wuxuu go'aaminayaa mararka ay jiraan shuruudaha gaarka ee la xariira oggolaashaha iyo sii wadidda hawgallada ururo-hantiyeedka dibadda haddii dabbaqidda mabda'a la soo sheegay ka dhigayo wax loo baahanyahay.

### Qod. 9

Dekereetada lagu oggolaanayo ee ku xusan qod. 6, Maamuluhu xitaa wuxuu oggolaanayaa qiimaha shuruudaha warqadaha caymiska ee laga sameeyay rururo- hantiyeedka.

### Qod. 10

Waxkabaddalka waraaqaha iyo xogta loo gudbiyay Xafiiska Warshadaha, Ganacsiga Gudaha iyo Shaqada sida ku cad shuruudaha qod. 7 iyo 8 waa in Maamuluhu oggolaadaa. Iyagu waxaa raad ah ma yeelanayaan illaa laga oggolaado.

### Qod. 11

Urur-hantiyeedka caymiska iyo sii-cayminta soomaalida, talyaaniga iyo kuwa dibadda oo helay oggolaashaha in ay ka shaqeeyaan Dalka, waa in ay abuuraan iyo xaddidaan qaababka lagu xusay qodobada 14 iyo 15:

a) lacag lagu bilaabo oo ah Sh. Som.20.000 oo lagu xisaabi karo keyd xisaabeedka;
b) lacag dammaanad ah Sh. Som. 5.000 oo danmiin u noqnaya hawlaha Dalka laga wado.

Iyagu waxay mudanyihiin curaarta lagu sameeyay shuruudaha qod. 7.

### Qod. 12

Keydka loogu talagalay in lagu qabto waajibaadka lagu qaaday hawlaha caymiska (keyd xisaabeedka) e la xariira santuuqa/portofoglio soomaalida, kama yaraan karo waxa ka dhashay iyadoo la qaadanayo saldhigga shaxda dhimashada, naafonimada iyo dulsaarka caqligalka ah ee ku xusan qod. 7.

Ururo-hantiyeedka waxay horimaanayaan Xaafiiska Warshadaha, Ganacsiga Gudaha iyo Shaqada ugu yaraan saddex sano kasta hal mar.

a) isbarbar-dhigga dhimasha lagu saasaalinayo shaxda la soo sheegay iyo waxyabaha dhaba ahaan dhacaya:

b) isbarbar-dhigga dulsaarka caqligalka iyo dhab ahaan laga helay isticmaalka keydka.

Marka ay jiraan waxyaabo la xooray oo ka mida waxyaba badan oo qiil u noqon kara cabsiyada muuqada ee ku saabsan ammaanka habsani u socodka farsamada ururo-hantiyeedka, Xaafiiska Warshadaha, Ganacsiga Gudaha iyo Shaqada wuuu u yeerayaa urur-hantiyeedka si uu soo jeediyo cudur-daaradiisa haddii aanay jirin qaraare hore.

### Qod. 13

Ururo-hantiyeedka caymiska Somaaliya, talyaaniga iyo kuwa dibadda jooga, waa in ay Dalka ku haystaan shardina uga dhigaan kuwa wax caymyay ee warqadahoda caymiska ay ka

mid yihiin boorsada Soomaaliya, hawgallada lagama maarmaanka u ah daboolidda keyd xisaabeedka ee la xariira boorsada la soo sheegay oo lagu salaynaynayo xisaabta waxyaabaha lagu sheegay qod. 12.

Isla waajibaadkaas wuxuu tartansiinayaa ururo-hantityedka aan qaadi karin halisyo cusub hasayeeshe xaddidaya maaraynta boorsada la soo sheegay. Arrimaha ku saabsan curaarta jirta waqtiga xaadirka waxaa joogsanaya waajbaadka dib-u-isticmaalka dulsaarka la xariira. Keyd xisaabeedka ku xusan faqradda sare waa in ay ka koobnaadaan mid aan ka badanay noocyada hawlgallada soo socda:

1) cinwanno la soo saaray ama laga ballanqaaday Maamulka Wasaayadda Talyaaniga ee Soomaaliya:
2) galal ay soo saareen Machadyada loo oggolaaday in ay dayn ka bixiyaan Soomaliya, lagana dammaanad qaaday Maamulka Wasaayadda Talyaaniga ee Soomaaliya;
3) hanti maguurto ah oo dalka yaalla, buugagga wax lagu rahmo;
4) wax wadaag lagu damaanad qaaday rahanta koobaad ee la saaray hantida maguurtada dalka taalla ee aan ka badnayn kala bar qiimaha maguurtada iyada ah;
5) wadaagyada dul saaran waraqaha caymiska nafta wixii ku siman xadka u dhigma qiimaha madax furashada;
6) curaarta lambarada leh ee taalla Bangiga Talyaaniga, laanta Muqdisho;
7) qaababka kale ee shaqo oo uu oggoaaday Xafiiska Warshadaha, Ganaacsiga Gudaha iyo Shaqada oo la soo marsiiyay Xaafiiska Arrimaha Maaliyadda, marka ay dhagaysteen guddiga lagu xusay qod. 6.

Daboolidda keyd xisaabeedka la soo sheegay waxaa kaloo loo qoondayn karaa dammaanadaha lagu samaysay si waafaqsan qod.11.

Keydka la soo sheegay waaa in la sameeyaa isagoo aan laga goyn qoondaha lagu baxshay caymiska.

Cinwaanada lagu soo sheegay lambarada 1, 2 ee qodobkaan waxaa lagu xisaabinayaa qiimahooda ay ku magacaabanyihiin.

Wadaagyada rahman iyo wadagyada ku qoran warqadda caymiska waxaa lagu qiimaynayaa qiimahooda waqtiga xaadirka dhammadka hawl kasta.

Hantida maguurtada waxaa lagu qiimaynayaa caadiyan qiimaha ay suuqa ka joogaan marka la qiimaynayo.

Haddii ay yihiin hanti maguurto noqday milkiga urur-hantiyeedka sadexdii sano ee ugu damabaysay, kuwaas waxaa lagu salaynayaa qiimaha uu ku soo galay ama lagu dhisay. Keydka xisaabeedka waa in ay ka koobnaadaan hawgallo ay leeyihiin ururo-hantiyeedka caymiska iyo sii-cayminta nafta.

**Qod. 14**

Cinwaanada iyo galalka lagu soo sheegay qod. sare haddii ay yihiin nooca qofka sita (al portatore) waa in lagu keydiyaa Bangiga Talyaanihga, laanta Muqdisho. Cinwaanada iyo galalka iyaga ah, curaarta lambaraysan iyo guud ahaan dhammaan qiimayaasha maguurtada ee loogu talagalay in lagu daboolo keyd xisaabeedka waa in ay u xirnadan kuwa la caymiyay, oo warqadahooda caymiska ay ka mid yihiin boorsada soomaaliya. Warqadda caymiska iyo keydka curaarta waa in ay ku jiraan caddaynta u xirnaanshaha (vincolante) ay leeyihiin tirada kuwa la caymiyay oo warqadahooda caymiska ay ka mid yihiin boorsada soomaalida.. Hantida maguurtada ah, warqadaha caymiska iyo rasiidka curaarta waa in ay ku jiraan caddaynta u xirnaanshaha oo ay leeyihin tirada kuwa wax loo caymiyay. Sina laguma samayn karo isbaddal

waraaqaaa caymiska iyo lambarrada la keydiyay haddii aan horay si cad u oggolaan Xaafiiska Warshadaha, Ganacsiga Gudaha iyo Shaqada.

Hantida maguurtada waxaa lagu qorayaa rahanta iyado lagu saleynayo Dekereto uu soo saaro Maamulaha, waxaana lagu dul qorayaa **,** muddada ku cad qod.2813 ee Xeerka Madaniga, darafka qoraalka diiwaangelinta rahanta lagu go’aamiyay dammaanadda wadaagga isaga ah. Ka saarista rahanta la soo sheegay iyo u xirnaanshaha waxa sidoo kale lagu qabanayaa dekereeto Maamulaha.

Diiwaangelinta qoraalka kooban waa kuwa aan lahayn canshuurta rahanta. Cinwaanada amaahda ee loo oggolaaday curaarta oo asal ahaan aan lahayn canshuurta shaabbadda (bollo) waxaa la aqbalayaa iygoo canshuurta iyada laga dhaafay inta ay ku xannibanyihiin Bangiga Talyaaniga. Sidoo kale waxaa laga dhaafayaa canshuurta shaabbadda rasiidka ay bixiyaan uruuro-hantiyeedka gaarka loo leeyahay munaasabadda lala baxayo cinwaanada curaarta la dhigay Bangiga Talyaniga marka la fulinayo Amarkaan iyo qodobada 2787 iyo 2745 iyo kuwaku xiga ee Xeerka Madaniga.

Waxa la xariira hawlgallada maguurtooyinka kale e ka kooban keyd xisaabeedka, u xirnaansha dammaanada kuwa caymiska ku jira sida uu qabo qodobkaan, waxaa lagu go’aaminayaa mudnaanta la siinayo tirada badan isla kuwa caymiska dhammaadka qod.2787 iyo 2745 iyo kuwa ku xige ee Xeerka Madaniga ee horay loo soo sheegay.

**Qod. 15**

Ururo-hantiyeedka soomaalida, taalyaniga iyo kuwa dibadda jira ee qabanaya caymiska nafta aadnaha waa in ay ku soo lifaaqaan miisaaniyaddooda liistada gorfaynte hawlgallada u xanniban daboolista keydaka iyo dammaanadaha, iyadoo la tilmaamayo hawlgal kasta qiimaha uu ku asteysanyahay sida uu qabo qod.14.

Dhammaadka hawl kasta waa in lagu go’aamiyaa tirada keyd xisaabeedka ee loogu talagalay in uu daboolo keydyada.

Bil gudaheed marka la oggolaado miisaaniyadda ururo-hantiyedku waa in ay dib u dhammaystiraan wixii cillada ah ee ka soo baxa heshiiska keyd xisaabeedka ee ku jira qiimaha hawgallada loogu talagalay in lagu daboolo keydka isaga waana in loo diro Xaafiiska Warshadaha, Ganacsiga Gudaha iyo Shaqada dokumentiyada caddaymaha la xariira. Haddii uu ku jiro dheeraad qiimaha hawlgallada xanniban marka loo eego qaddarka tirada keydka, ururo-hantiyeedku waxay codsan karaan in laga qaado dheeraadka isaga, kaaso la qabanayo marka la helo oggolaashaha Xaafiiska Warshadaha, Ganacsiga Gudaha iyo Shaqada.

**Qod. 16**

Ururo-hantiyeedka soomaalida, talyaaniga iyo kuwa dibadda jira ee caymiska nafta waa in ay bixiyaan sanad kasta faaiidada saafiga ee ka yimid hawlgallada ay Dalka ka qabteen wax aan ka yareyn 10% si ay u yagleelaan keydka caadiga ee ku xusan qod. 2428 Xeerka Madaniga. Bixintaas waa in la sii wadaa illaa ay ka gaareyso ugu yaraan 5% keydka xisaabeedka.Haddii lacagta dib laga sameeyay ay hoos u dhacdo sababa kasta awgood ama la waayo qiyaasti u dhignayd, waa in la dhammaystiraa ama la kordhiyaa lacagta keydka isla qaabkaas. Lacgtaas kaydka iyada waa in lagu maalgeliyaa mid iyo ka badan qaabka hawlaha ku xusan 14.

**Qod. 17**

Ururo-hantieedka ku tala jira in ay sameeyaan hawlgallo kale ee caymis ka sakow midkii caymiska nafta waa in ay ku tilmaamaan xeerarkooda qaybta ka mida raasamaalka ama keydka

ee loogu talagalay in lagu bixiyo waajibaadka ka imaanaya caymiska nolosha waana in ay haystaan maareyn gaara.

Raasamaalkaas iyo keydka marna kama yaraan karo qaddarka tirada ku cad qodobada 7 iyo 17.

Hawgallada ku saabsan mareynta caymiska nolosha looma duwi karo in lagu bixiyo waajibaadyo nooc kale.

## CINWAANKA 3AAD

Caymiska Liddiga Waxyeellada

### Qod. 18

Ururo-hantiyeedka soomaalida ee doonayaa in ay samaystaan sancada caymisyada iyo si-cayminta liddiga waxyeellada, ururo-hantiyeedka talyaniga e dibadda ee doonaya in Soomaliya ay ku yeeshaan wakiil Dalka uga shaqeeya sancada caymiska ama sii-cayminta liddiga waxyeellada waa in ay marka hore loogu oggolaadaa qaabka iyo habka lagu caddeeyay qod. 6 ee la soo shegay.

Si loo helo oggolashaha la soo sheegay ururo-hantiyeedku waa in ay u soo gudbiyaan Xaafiiska Warshadaha, Ganacsiga Gudaha iyo Shaqada codsiga la xariira iyo in ay bixiyaan, haddii ay soomaali yihiin, caddaynta ah in si sharci ah loo dhisay, haddii ay talyaani yihiin ama kuwa dibadda, oo si sharci aha Dalka looga dhisay wakiilnimada si waafaqsan faqradda 1 qod. 8. Samaynta caymiska ama sii-cayminta liddiga waxyeellada looma oggola ururo -hantiyeedka soomaalida, talyaaniga iyo kuwa dibadda jira in ay haystaan raasamaalka la wadaago, ama, haddii ay yihiin shirkadaha caymiska wadaagga, lacagta dammaanad ka yar:

a) sh. som. Shanboqolokun, oo saddex-boqolokun la soo shubo, marka hawsha la qabanayo ay ku koobantahay liddiga waxyeellada ama ay ku jirto caymisyada liddiga halisyada gubashada ama gaadiidka;

b) sh. som. lababoqolokun, oo boqoliyokontokun la soo shubo, marka laga reebo hawlaha caymisyada iyo sii-cayminta nafta aadanaha iyo kuwa lagu sheegay xarfka a) ee la soo sheegay hasayeeshe ay ku jiraan liddiga mid aan ka badanyn halisyada soo socda: shilalka, cudurrada, masuliyadaha madaniga iyo tuugada;

c) sh. som. Boqolkun, oo toddbaatankun oo ka mida la soo shubo, oo ku saabsan laamaha kale marka laga reebo caymisyada iyo sii-cayminta nafta aadnaha iyo kuwa lagu qeexay xarfka a) iyo b) ee la soo sheegay.

Maamulaha, marka uu dhagaysto Guddiga ku xusan qod. 5 wuxu ku oggolaan karaa, dekereeto, ururo-hantiyeed ka shaqeeya mid qura oo ka mida laamaha looga baaraandegay xarafka c) ee la soo sheegay, marka raasamaalka wadaagga ama, haddii ay tahay shirkadda caymiska wadaagga, lacagta dammaanadda, ay ku xaddidantahay lacag ka yar, hasayeeshe aanay ka yareyn sh. som. Kontonkun.

### Qod. 19

Ururo-hantiyeedka soomaalida, talyaaniga iyo kuwa dibadda jira, xita hadduu uu yahay qaabka wadaagga ama iskashatada, si ay Dalka uga shaqeeyaan caymisyada ka duwan caymiska nafta aadanaha, waa in ay aasaasan iyo u xiraan, tirada badan ee waxyaabaha la caymiyay ee ku saabasan heshiisyada lagu qaabeeyay boorsada soomaalida, dammaanad lala mid dhigayo dhammaadka hawlgal kasta oo ah 35% abaalgudyada duuduubka hawlgalladi dhacay/dhaqn ka

baxay ee la xariira caymisyada, ee lagu galay isla hawlgalka ama muddo ka horreysay halisyada ku jira boorsda soomaalida sida uu qabo qod.1

Abaalgudyadaas waxaa loo qaadanayaa in ay ku jiraan kaabayaasha iyo wixii raacsan marka laga reebo keliya canshuurta la saarayo waxa la caymiyay. Dammaanadaha la soo sheegay, sina kama yaraan karaan sh. som. 3.000 wixii la xariira ururo-hantiyeedka soomaalida marka loo eeggo xeerkooda dhismaha ay qaban ka hawlgali karaan laan keliya ee caymis iyo kuwa talyaaniga iyo kuwa dibadda jira ee loo oggolaaday in ay dalka ka hawlgalaan laan qura ee caymis, lacagta ah sh. Som. 5.000 wixii la xariira ururo-hantiyeedka soomaalida, talyaaniga iyo kuwa dibadda, oo marka leh xeerkooda, ay qaban karaan ama loo oggolaaday in ay qabtaan laamo badan ee caymis.

Halbeegga ugu yar sidoo kale waxaa laga donayaa ururo-hantiyeedka soomaalida, talyaniga iyo kuwa dibadaha sikastaba in ay Dalka ka bilabaan hawlgallo caymis. Waajib kuma aha dammaanadda ururada caymiska wadaagga iyo shirkadaha iskashatada kuwaaso shuruucda u yaalla ama keliya ay ka shaqeeyan hal Deegaan, laakin waxaa shardi ah abalgudyada iyo lacagaha sanadlaha la bixiyo aanay ka badnaan sh. Som. 1.500 laan kasta iyo iskujirka laamaha shaqeynaya sh. Som. 6.000.

Dammaanadda urur-hantiyeedka caymiska liddiga waxyeellada waa in lagu dhisaa hawlqabadyo ay leeyihiin ururo-hantiyeedka iyaga ah.

**Qod. 20**

Samaynta dammaamadaha lagu soo sheegay qod. sare ee ku saabsn hannaanka curaarta iyo xannibaadda hawlqabadyada ku aaddan samyntaas iyo qiimaynta hawlqabdyadaas waa in loo hoggaansamaa, haddii la dabbaqi karo qodobada 14 iyo 15 ee xeerkaan.

**Qod. 21**

Ururo-hantiyeedyada liddiga waxyeellada,saddex bilood gudahood marka laga joogo xiritaanka hawsha, waa in ay soo wargeliyaan Xafiiska Warshadaha, Ganacsiga Gudaha iyo Shaqada waxyaabaha looga baahanyahay in lagu sameeyo dib-u-eegis ku-meelgaara ee caymiska iyo illaa hadda waxyaabaha looga bahanyahay ee xannibaadda aanay daboolayn dammanadda, ururo-hantiyeedka waa in ay dhammaystiraan soddonka cisho ee ku xigta dhicitaanka saddeda bilood ee la soo sheegay, iyo u diraya xaafiiska la soo sheegay dokumentiyada caddaymaha la sii qorsheeyay.

Dib-u-eegista ugu dambaysa ee dammaanadda, waa in la saameeyaa iyadoo lagu saleynayo natiijooyinka miisaaniyadda. Ururo-hantiyeedka waa in ay ku soo lifaaqaan miisaaniyaddooda liistada falanqaysan ee hawlqabdyada xanniban si loo daboolo dammaanadaha, iyadoo la tilmaamayo waxqabad kasta ee qiimaha loo qorsheeyay ee ku salaysan qiimayaasha la sameeyay dhammaadka waxqabashada sida uu qabo qodobka 14 ee la soo sheegay.

Dhammaystirka wixii cillado soo baxa ee dammaanadda iyo ka saaridda xannibaadda waxyaabaha dheeraadka waxaa loo hoggaansamayaa qaraarada ku qoran qod. 16 ee la soo sheegay. Marka la yareynayo dammaandda xanniban, Maamuluhu wuxu go’aamin karaa in dheraadka loo qoondeeyo in lagu bixiyo magdhoyada haray ee la xaq-gudayo oo aan weli la bixin.

Xannibaad ka-saarista idil ee dammaanadda waxaa oggolaanaya Maamulaha, marka urur-hantiyeedka, sabab kasta ha ugu wacnaatee, uu joogsado waxqabashada caymiska, kadib marka uu muujiyo in uu baaba’ay waajib iyo ballanqaad kasta ee uu ku qaaday caymisyada.

**CINWAANKA 4AAD**
Miisaaniyadda Urur-hantiyeedka Caymiska

**Qod. 22**

Wixii ku saabsan ururo-hantiyeedka caymiska ee lagu nidaamiyay Amarkaan waxaa la gaarsiinayaa marka laga joogo lix bilood xiritaanka miisaaniyadda. hawlqabadka muddada ku xusan qod. 2364 Xeerla Madaniga si loo oggolaado Ururo-hantiyeedka si gooniya u hawlgala sii-caminta muddada kor lagu sheegay waxaa la geyn karaa Xaafiiska Warshadaha, Ganacsiga Gudaha iyo Shaqada siddeed bilood, marka ay codsadaan ururo-hantiyeedka iyaga.

**Qod. 23**

Miisaaniydda oo ay la socdaan warbixinada maamulayaasha iyo guddiga baarista iyo dod-qoraalka oggolaashaha golaha, waa in loo soo gudbiyaa Xaafiiska Warshadaha, Ganacsiga Gudaha iyo Shaqada muddo ku siman lix bilood marka la oggolaaday.

**Qod. 24**

Wakiilnimada Soomaliya dhexdeeda shirkadaha Talyaaniga iyo kua dibadda ee caymiska iyo sii-cayminta waxaa loo oggolyahay in ay geeyaan Xaafiiska Warshadaha, Ganacsiga Gudaha iyo Shaqada dokumentiyada miisaniyadda si waafaqsan qaabka u degsan shuruucda dalka asalka iyo, haddii ay yihiin ururo-hantiyeed dibadda oo talyaani loo soo wareejiyay, iyadoo la tilmaamayo xogaha, ka sokow lacagta qalaad ee isla Dalka, Soomaaliya dhexdeeda. Waa in, laakiin ay ka sameeyaan xisaab-celin gaara hawlaha ay Soomaaliya ka qabteen.

**Qod. 25**

Ururo-hantiyeedka caymiska iyo sii-cayminta soomaalida, talyaaniga iyo kuwa dibadda, ka sakow buugagga sharciga ee ku xusan qod.2314 iyo kuwa ku xigaa ee Xeerka Madaniga waa in ay ku haystaan xarunta iyo wakiilnimada dhexe ee Soomaliya ku yaalla caymisyada ka mida boorsada soomaalida:

1) diiwaanka heshiisyada, iyo xitaa u kala qaybsan hay'ado sida ay u kala horreeyaan waqti ahaan lagu qoray heshiiyadi lagu galay xarunta iyo wakiilka iyadoo la tilmaamayo taariikhda iyo waxa gedaaman, soo jeedinta iyo kaamilnimada heshiisyada;
2) buugga uruurinta waxyeellada ee lagu qoro waxyeellada lagu ashtakooday sida ay u soo kala horreyeen waqti ahaan iyo meelaha ay ka yimaadeen ashtakooyinka;
3) diiwaanka heshiisyada waqtigoodi dhacay;
4) diiwaanka heshisyada ay ku timid dhecitaanka;
5) diiwaanka heshiiyada ay ku timid madax-furashada;
6) diiwaanka abaalgudyada lagu xusay xeerarka canshuuraha caymisyada saaran;
7) buugga xisaabadka keli ahaaneed ee wax la caymiyay oo ay wehliyaan ka qaybgalkafaaiidada.

Ururo-hantiyeeda waxay iqtiyaar u keeyihiin in ay hal buug wax ku uruuriyaan ama laba kaar ama ka badan diiwaanada la soo sheegay, waxaase shardi ah suurtagalka in si saxan oo dhammaystiran laga ogaan karo waxyabaha idil ee la soo sheegay. Xaafiiska Warshadaha, Ganacsiga dibadda iyo Shaqada wuxxu iqtiyaar u leeyahay in uu soo saaro nidaamyo lagu keydinayo buugagga la soo sheegay iyo in ay weydiistaam ururo-hantiyeedka in ay haystaan buugag iyo diiwaanno kale. Xarunta wakiilnimada dhexe ee Soomaaliya ee ururo-hantiyeedka waa in lagu keydiyaa tala soo-jeedimada caymisyada,

nuqullada warqad kasta ee caymiska ee la sameeyay iyo midka caymiska nafta, warqadaha dhaqaatiirta la xariira.

Sidoo kale waa in la keydiyaa nuqullada heshiisyada caymiska, hoos-u-dhigidyada iyo ka qaybgallada waxyaabaha idil ee la xariira.

**Qod. 26**

Ururo-hantiyeedka caymiska iyo sii-cayminta soomaalida, tayaaniga iyo kuwa dibadda waxaa ku waajiba in ay dhiisan keydka abaalgudyada waxyeellada ka duwan caymiska nafta aadanaha ee socda dhammaadka waxqabadka iyadoo lagu qorayo miisaaniyadda wadarta jajabyada warqadda caymoska oo iqtisaaskeeda ay leeyihin hawlqabatyada ku sii xiga iyo tirada lacagta sanadlaha ee abaalgudyada bixintida la sii hormariyay sanadaha soo socda. Waxaa iqtiyaar loo siiyay in la xisaabiyo abaalgudyada la helay markaa iyaga aan lagu go’aamin heshiis kasta marka loo eego dhicitaankooda wixii la xariira, halbeegga dhe-dhexadka oo aan ka yarey 35% abalgudyada ku saabsan halisyada lagu galay hawlqabadyada. Wixii ku sabsan halisyada waqtiga gaaban kama yaraan karto 15% abaalgudyadu. Waxaa loo aqoonsanayaa halisyada waqtiga gaaban xaaladaha soo socda:

1) caymisyaha halka safar keliya ee markabka oogadiis ama daabuladda alaabada;
2) caymisyada muddadoodu aanay ka bdnayn lix bilood.

Daboolidda tirada keydka ee abalgudyada ku saabsan halisyada socda waxaa xitaa loo qorshayn karaa qiimaha hantida guurtada iyo maguurtada loo xannibay dammaanadda sida ku xusan qod. 20.

**CINWAANKA 5AAD**

Ilaalinta Ururo-hantiyeedka Caymisyada

**Qod. 27**

Ilaalinta dabbaqidda Amarkaan waxaa u xilsaaraan Xaafiska Warshadaha, Ganacsiga Gudaha iyo Shaqada.

Gacansiinta ilaalinta waxaa lagu samaynayaa halbeegga hal- kunkiiba abaalgudyada lagu soo xareeyay hawlgalkiiba.

Si loo xisaabiyo tirada guud gacansiinta la soo sheegay saddexda bilood ee ugu horreysa sanad kasta ururo-hantiyeedka caymiska iyo sii-cayminta waxay geynayaan Xaafiiska Warshadaha Ganacsiga Gudaha iyo Shaqada shaxda abaalgudyada soo xarooday, oo ay ku jiraan qoondayaasha abaalgudyada oo isla iyagu ay ku bixiyeen sii-caminta iyo waxyabaha sanadkii tegay.

**Qod. 28**

Xaafiiska Warshadaha, Ganacsiga Gudaha iyo Shaqada wuxuu iqtiyaar u leeyahay in uu ku sameeyo ilbaadin xarumaha wakiilnimada guud ee ururo-hantiyeedka iyo shaqaalaha ka shaqeeya, wakiilada, xaafiisyada maxalliga, kuwaaso sikastaba haya hawlaha caymisyada iyo sii-cayminta, si loo baaro xilgudashada iyo u hoggaansanaanta shuruucda u degsan Amarkaan iyo dekeretooyinka lagu oggolaaday.

Haddii kuwan ay yihiin ururo-hantiyeed dad ama wakaalado oo ku lug leh jabinta amarkaan, Xaafiiska Warshadaha, Ganacsiga Gudaha uyo Shaqada wuxuu iqtiyaar u leeyahay in uu baaro jabinta isagoo u xilsaaraya saraakiisha si ay soo hubiyaan. Ururo-hantiyeedka, maamuladooda, wakiladooda, agaasimayaasha, laamahooda waa inay u diyaariyaan

saraakiil loo soo wakiisho ilbaadinta buugagga idil iyo diiwaanada iyo dokumentiyada sidoo kale waa in ay bixiyaan macluumaadka iyo faah-faahinada la weydiisto.

Ururo-hantiyeedka soomaalida, talyaaniga iyo kuwa dibadda ee camisyada iyo sii-caminta waxaa ku waajiba in ay siiyaan Xafiiska Washadaha, Ganacsiga Gudaha iyo Shaqada macluumaadka iyo xogaha tirakoobyada uu weydiisto Xaafiiska isaga.

**Qod. 29**

Marka aan loo hoggaansamin qodobada Amarkaan iyo dekereetooyinka la socda amase khalad uu ka jiro qaabka shaqada u socoto, Maamuluhu wuxuu soo saari karaa  dekereeto lagu baahiyo Faafinta Rasmiga, oo uu ka mamnuucayo ururo-hantiyeedka in uu qabto arrimo cusub illaa iyago ay fulinayaan shuruucda la soo sheegay amase aanu suulin khaladka. Maraka ay horay u jireen hoggaasan la’aanta qodobda Amarkaan amase ku  lugyeelasha sharci-jabinta qodobada Amarkaan isaga ah, Maamuluhu wuxuu iqtiyaar u leeyahay in uu geliyo ururo-hantiyeedka  xaq-gudid.

Samaynta xaq-gudidda waxaa la dabbaqayaa si la mida, haddii ay suurtgal tahay qodobada Cinwaanka VI .

**CINWAANKA 6AAD**

Xaq-guddidda iyo Musalifnimada Ururo-hantiyeedka Caymiska

**Qod. 30**

Ururo-hantiyedka soomaalida ee caymiska nafta aadanha, xitaa haddi ay qabanayaan caymiska waxyeellada, haddii aanay haysan waxqabad ku filan ee dabooli kara keyd xisabeedka uruuro-hantiyeedka talyaaniga ee dibadda ku sugan, marka waxqabadka Dalka ka si jiray aanu ku filnayn in ay daboolaan keyd xisaabeedka heshiisyada Dalka lagu galay, waxaa la gelinayaa xaq-gudidda kadib maarka baaris uu ku sameeyo Xaafiiska Warshadaha, Ganacsiga Gudaha iyo Shaqada, xaaladaha maaliyadeed ee isla ururo-hantiyeedka.

Si loo sameeyo baarista la soo sheegay waa in tirada lagu daraa:

a) daynta saamilayda, raasamaalka aan la soo shubin;
   1) amaahaha aan la helin Karin;
   2) kharashka rakibaadda ugu horreeya ee aan weli  dayntoda la bixin:
   3) waxaa la xariira kharashka helitaanka ee aan weli la bixin daynta waxaa la oggolyahay kharsh bilow aha oo aan ka badnayn abaalgudka koobaad ee sanadlaha. Hantida guurtada waxaa lagu samaynayaa dayn-bixinta sanadlaha boqlkiiba toban;
b) go’aaminta khasaraha:
   1) raasamaalka guud iyo lacagta la shubay ee ku-meelgaarka xubnaha kale ee ururada wadagga;
   2) lacagaha keydka yaalla ee ururay oo uu wehliyo kootada faaiidada qaybta dheeraadka 5% ee keyd xisaabeedka.

**Qod. 31**

Xaafiisla Warshadaha, Ganacsiga Gudaha iyo Shaqada wuxuu baarayaa cilladda hawlqabadyada xanniban ee lagu daboolayo keyd xisaabeedka ee la xariira heshiisyada boorsada soomaalia, wuxuu u yeerayaa ururo-hantiyeedka in ay dib u soo dhammaystiraan isla faraqa bil gudaheed, taaso marka ay dhammato haddii aany dhicin dib soo dhammaystirka, islamarkaana aan wax cudurdara la keenin, Maamulhu wuxuu bilaabayaa xaq-guddidda urur-hantiyeedka

marka uu dhagaysto talada Guddiga ku xusan qod. 6, isagoo dekereeto ku soo saaraya lagu baahiyo Faafinta Rasmiga.

Lagama noqon karo qaraarka haddi haddii soo dhammaystirka dib laga keeno. Dekereetada waxaa lagu magacabayaa sarkaal maamulka xaq-guddidda urur-hantiyeedka oo leh awodaha xaq-gudayaasha shirkadaha ganacsiga. Xaq-guddidda waxay ka dhacysaa iyadoo Xaafiiska Warshadaha, Ganacsiga Gudaha iyo Shaqada uu ilbaadinayo.

Awooddaha xaq-gudiddaa waxaa lagu go’aaminayaa dekereetada lagu magacaabay waxaana lagu socdsiinayaa xaq-gudidda.

Qaraarada Maamulaha waxaa lagu duri karaa cabasha gooniya oo loo qaato Maxkamadda Garsoorkas sida uu qabo qod. 14 dekereetada Madaxweynaha Jamhuuriyadda ee 9 Disember 1952, lamba. 2357.

**Qod. 32**

Marka laga soo tago cilladda ka timaadda dhinaca la-caymiyeyaasha oo lagu samaynaya waraaq helitaankeeda la soo celiyao, heshiisyada caymisyada socda waa sii soconayaan si ay u daboolaan halisyada illaa 60 cisho ka dib marka lagu baahiyo dekereetada xaq-guddidda Faafinta Rasmiga.

Xaqlayaasha raasamaalka la caymiyay iyo magdhowga warqadda caymiska dhacay ama halisyada waxay qayb qaadaanayaan qaybsiga faaiidada sida ku xusan qod.16.

**Qod. 33**

Sarkaalka xaq-gudidda wuxuu samayn karaa dacwadda liddi ku ah masuuliyadda maamulayaasha.

Waxaa lagu dabbaqi karaa ururo-hantiyeedka xaq-gudidda sida uu qabo qodobada Amarkaan ee ku saabsan dambiyada arrimaha musalifnimada.

**Qod. 34**

Warqadaha caymiska nafta aadanaha ee shaqeynaya dhammaadka 60 cisho ee laga joogo taariikhda baahinta dekereetada xaq-gudidda ama midda ka horreysa meelaynta ku xiran ka noqoshada waxa la caymiyay waxay kala qaybqaadanayaan qaybinta faaiidada u dhiganta caddadka keyd xisaabeedka oo lagu xisabinayo iyadoo lagu saleeyanayo abaalgudka saafiga. Xaqlayaasha warqadaha caymiska dhacay ama waxyeellada ka horreeyay baahinta dekeretdada xaq-gudidda, ama ka dambaysay, laakiin muddada lagu soo xusay faqradda koobaad dhexdeeda, amse muddada ku xiran wixii ka noqosho ah ee kuwa danaynaya, waxay kala qaybqaadanayaan qaybsiga u dhigma caddadka raasamaalka la caymiyay ee sandlaha nolosha. Warqadaha caymiska ee liddiga waxyeellada ee jira muddada lagu soo sheegay faqradda kobaad, waxay kala qabqaadanayaan qaybsiga u dhigma jajabka abaalgudyada u dhigma halista aan weli dhicin. Kuwa xaqlayaasha ee warqadaha caymiska waxyeellada ee ka horreyay baahinta dekereetada xaq-gudidda ama ka dambeysay muddada 60 cisho gudahood ee ka dambaysay baahinta dekereetada iyada ah ama muddada ku xiran ka noqshada caymiska waxay kala qabqaadanayaan qaybsiga wax u dhigma kororka abaalgudyada laga helay Heshiiska. Wixii daymo kale waxaa la dabbaqi karaa, iyadoo laga soo bilaabayo marka la baahiyay dekereetada xaq-gudidda, xeerarka nidaaminaya musalifnimada, isla oggolaashaha hore, maamulka dhowrsan iyo xaq-gudidda qasabka ah.

**Qod. 35**

Mudnaan gaara ayay ku leeyihiin hawlqabadyada xanniban iyo daboolista keyd xisaabeed, sida ku xusan qod. 15 amaahyada ay khusayso:

a) raasamaalka la caymiyay ee lagu helay warqadda caymiska nafta aadanaha waxyeeloobay oo ku yimid dhicitaanka muddada lagu sheegay qodobka 34;

b) keyd xisaabeedka la raacinayo warqadda caymiska lagu oggolaaday qaybinta lacagta laga helay madax furashada la weydistay saddex bilood ka hor bilowga xaq-gudidda. Daymaha lagu soo sheegay faqradda sare waxay mudnaan gaara ku leeyihiin qaddarka guud ee lacagta laga rabo ururo-hantiyeedka lacgta laga doonayo urur-hantiyeedka caymiska ee ku xiran heshiisyada iyo qandaraasyada caymisku uu la galay urur-hantiyeedka la xaq-gudayo.

**Qod. 36**

Marka uu urur-hantiyeed uu iskiis isku geliyo xaq-gudidda, Maamuluhu wuxuna dekeretadiisa oo lagu soo saaro Faafinta Rasmiga ku caddaynayaa in isaga lagala noqday oggolaaashahii caymsaka lagu qabanayay. Xaq-guddida waxaa lagu qabanayaa shuruucda u degsan Xeerka Madaniga marka laga reebo arrimaha amarkan qorayo oo ku saabsan mudnaanta gaarka ee ay leeyihiin kuwa lagu caymyay keyd xisabeedka iyo dammaanadaha iyadoo weliba aanay ku jirin habka u degsan xaq-gudidda qasabka ah mararka uu sheegayo Amarkaan. Xaq-gudayaasha waa in ay u soo gudbiyaan Xafiiska Warshadaha, Ganaciga Gudaha iyo Shaqada miisaaniyadda sanadlaha si loo mariyo u hoggaansnaanta xeerarka Amarkaan.

**Qod. 37**

Haddii ururo-hantiyeedku caymiska nafta uu musalifo iyo kan liddiga waxyeellada waxaa la dabbaqayaa qodobada la soo sheegay arrimaha ku saabsan qaybinta waxqabadyada marka loo eego kuwa la caymiaya amase kuwa xaqa leh ee la xariira mudnantala ay leeyihiin. Arrimaha ku saabsan ururi-hantiyeedka caymiska nafta iyo liddiga wayeellada horay loo caddeeyay musalifnimada, sikastaba ha ahaato xaaladda musalifnimada socotay, iyo kuwa ka dambeeya, daymaha u dhigma waraaqadaha caymiska jiray taariikhda lagu dhawaaqay musalifnimada iyo kuwa caddaynta daynlayaasha danaha kale aanay samayn, waa laga maagayaa xaafiis ahaan marka uu weydiisto dhowraha (curatore). Marka aan loo hoggaasamin shuruucda ku xusan faqradda sare midkasta oo ka mida daynlayaasha oo xaafiis ahaan aan laga maagin iyo aan la qancin, ama dadweyne u doodaha isgo u daneynaya aanu soo dhexgalin, markasta waxay codsan karaan xita ka dib habka musalifanimada in la xiro ama la joojiyo dib u furidda musalifanimada.

Ka noqoshada oggolaashaha lagu qabanayo caymiska ururo-hantiyeedka ee la caddeeyay in uu musalifay waxaa lagu soo saarayaa dekereeto Maamulaha taaso lagu baahinayo Faafinta Rasmiga.

**CINWAANKA 7AAD**

Xeer guud iyo ciqaabo

**Qod. 38**

Soomaaliya waxaa la reeban hawlgallada shirkadaha iyo ururo-hantiyeedka soomalida, talyaaniga iyo kuwa dibadda waxa loo yaqaaqaan raasamaal-biirsiga ama haddii kale loogu magacdaray, wax u dhigma qaaraanka ay bixiyaan xubnaha shirkadda, ama ku qoran guud ahaan dhinacyada heshiiska, waxay ballan qaadayaan in ay bixiyaan lacago ama cinwaano amaaha oo

leh dhicitaan qaddiman oo lagu soo saaro qorituur ama qaaab isbed-baddala soo saarista qorituurka labaad.

Ururo-hantiyeedka raasamal-biirsiga ama tashiilka, soomaalida, talyaaniga iyo kuwa dibadda waxay xilqaadayaan iyagoo aan shardi looga dhigayn soo saarista qorotuurka ballan-qaad u dhigma lacago ama ay keenaan cinwano oo lagu bixinayo abaalgudyo leh dhicitaan taariikh soo noqnoqota, waxaa lagu dhaqayaa qodabada Amarkaan oo quseeya oggolaashaha in lagu shaqeeyo xeerarka kale haddii la dabbaqi karo.

Ururo-hantiyeedka waa in ay u xiraanaadaan kuwa xuquuqda leh si ay lacagta ama cinwaanada amaahda uga qaataan, hawlqabdyo badan oo u dhigmaa abalgudyada ay soo xaraysteen ee kororka dulsaarka ka kooban caqligalka macaashka dhex-dhexaadka oo lagu go’aamiyo dekereeto uu soo saaro Maamuluha, kadib marka uu dhagaysto talada Guddiga ku xusan qod. 6.

Isla ururo-hantiyeedka waxaa lagu ballaarinayaa, haddii la dabbaqi karo qodobada ku qoran Cinwaanka XI ee la soo sheegay.

### Qod. 39

Shirkadaha leh qaabka iskaashiga iyo ururada wax iswaydarsiga caymiska waxay la mid yihiin urur-hantiyeedka kale caymiska arrimaha la xariira waajibaadka canshuuraha. Shirkadaha iskashiga ee ku hawlan caymisla nafta, xadka qofnimada u degsan kootada bulshada waxaa lagu xaddiday sh. som. 5.000.

### Qod. 40

Waxyaabaha ku saabsan qiimaha curaarta hantida guurtada, marka loo eego dhaqangalka Amarkaan, ee ku sugan Bangiga Talyaaniga, laanta Muqdisho, waxaa la saarayaa canshuurta keydinta oo ah halbeegga kunkiiba hal raasamaalka magacaaban.

### Qod. 41

Dhammaan xubnaha u xilsaaran adeegga dibadda ama gudaha ee wakaladaha loo oggolaaday hawlqabadyada caymiska nafta aadanaha iyo wakiilada dallaalada caymiska nafta nooc kasta ha ahaadeene, waxaa ka reeban in si toosa ama si dadban looga dhaafo la-caymiyha ama dhinacyada heshiiska caymiska dhammaantiis ama qayb ka mida waxa la helay wixii ka soo baxa.

Waxaa ka reeban caymisyada in ay si toosa ama si dadban ay siiyaan caymiyaha ama dhinacyada heshiiska caymiska dhaafidda waxyaabaha lagu helayo caymiska nafta. Sidoo kale wax reeban dhaafidda haddii ay ku timid qaabka hadiiyadaha alaabta iyo shayo marka laga reebo hadiiydaha aan qiima weyn lahayn.

### Qod. 42

Sikastaba dadka u xilsaaran hawlaha hay’adaha wax caymiya, sida uu qabo qodobka sare, ee ku xadgudba reebitaanka dhaafidda waxaa lagu qaadi karaa ciqaab ganaax lacageed oo aan ka badnayn saddex jibbaar caddadka waxa laga helay oo idil oo ka yimid asal ahaan arrimaha keenay xadgudubka.

Isla ciqaabtaaso la soo sheegay waxaa lagu soo rogayaa marka cid ay fududayso arrintaas ama ay is-hortaagtay baarista. Marka uu jiro xadgudub cusub oo dhacay 12 bilood gudahood kan la soo sheegay, ka sokow in la dabbaqayo ganaaxa waxaa la siinayaa digniin qofka ku xadgudba, haddii xadgudub kale uu dhaco 12 bilood gudahood ee ku sii xigta, waxay sababaysaa in lagala

noqdo wakiilnimadi la siiyay iyo in la ruqseeyo ama in laga joojiyo xiriir kasta, xitaa mid mar-mar ah, xaaladaha kale.

Shaqaalaha lagala noqday ama la ruqsiiyay lagama shaqalayn karo mudda ku siman hal sano wakaalad kale ee caymis hawlaha ku saabsan qaybta caymiska nafta, iyo xadgudbayada la xariira waxaa lagu qaadi karaa ganaxa lacageed ee ku xusan qodobka soo socda.

**Qod. 43**

Marka xadgudubka qodobada dhaafidda ay gasho wakaalad wax caymisa, waxaa lagu dabbaqayaa wakilkooda sharciga ganaax lacageed oo gaaraya ugu badnaan sh. som.10.000.

**Qod. 44**

Wakaaladaha wax caymiya waxaa ku waajiba in aanay oggolaan iyo samayn dhug-la’anta caymiska nafta iyo inay ka gacan ka geystaan dhacdooyin lagu horjoogsanayo. Waxaa noqonaya dhug-la’an ficillada:

a) in isla qofka looga sameeyo caymiska nafta laba wakaalad caymis oo kala duwan lix bilood gudahood oo ku timaadda in warqadaha caymiska laga dhammaystiro hal wakaalad, iyo isla waqtigaas kan labaad uu sameeyo baarista caafimaadka qofka la caymiyay, iyo haddii uu yahay caymis aan lahayn baarista caafimaadka, wakaaladda haysata saxiixa hindisaha ka dib urur-hantiyeedka kale;

b) marka la joojiyo bixinta abaalgudka warqadda caymiska nafta iyadoo lixa bilood la soo dhaafay iyo sagaalka bilood ee ku xigta dhicitaanka abaalgudka koobaad oo aan la bixin, in urur-hantiyeed kale lala galo caymiska nafta oo cusub isla qofka. Sikasta haddi caymiska labaad lagu sameeyo qiima ka duwan midkii hore waxaa dhacaya dhug-la’aan ee sababa la xariira qiima hoose.

Dib u soo nolaynta warqadda caymiska laba sano gudahood oo laga joogo dhicitaanka tii koobaad ee aan la bixin ma keenayso dhug-la’aan dhib u keenta wakaladda kale kaaso kan la caymiyay uu muddada u dhaxeysa u gudbiyay hindisaha lana galay heshiiska.

**Qod. 45**

Isla marka hindisaha caymiska wakaaladaha caymiska waa in ay weydiiyaan su’aalahaan gaarka:

a) in ay jirto wakaalad kale ee caymiska nafta ee uu la galay lana sugayo dhammaystirkeda;

b) in uu saxixay hindise kale ee ku saabsan lixdii bilood ee u dambaysay;

c) haddii hindisaha caymisku aanu doonayn in uu ku baddalo kuwa kale ee hadda socda;

d) haddii isagu aanu bixin abaalgudka sagaalkii bilood ee ka horreysay taariikhda hindisaha.

Hindisaha waxa la aqbali karaa marka jawaahaba su’aalaha ay yihiin kuwa si adag aan keenayn dhug-la’aanta. Dhinaca heshiiska galaya ayaa ka masuula dhibaatooyinka ku imaan kara caymiyaha oo ka dhasha caddaymahiisa, haddii kuwaasu aanay run ahayn.kkkkk

**Qod. 46**

Sand gudahiisa markaa laga joogo tariikhda dhicitaanka abaalgudka koobaad ee aan la bixin, wakaaldda wax caymisay dhibaatada ka soo gaartay dhugla’aanta, waxaa xaq loogu leeyahay wakaaladda dhuglanta sababtay in ay suurtageliso caymiska, iyadoo ujeeddadaas u adeegsanaya abaalgudka ama abalgudyada iyadu ay qaadatay.

Marka caymiyuhu aanu oggolaan in uu heshiiska galo ama in uu sii wado caymiska wakaaladda ku dhacday mashquulinta, wakalaadda sababtay dhug-la’aanta waxaa la saari karaa ganaax lacageed oo aan ka yareyn caddadka abaalgudka sanadlaha oo wakaaladda iyada ay ku qadatay raasamaalka caymiska dhug-la’aanta sababay.

**Qod. 47**

Kan wax soo saaray ama wakiika dhug-la’aanta ku dhibaateeyay wakaalad kale waxaa lagu qaadi kara ganax lacageed oo aan ka yareyn caddadka lacagta laga helay ama abaalgudyo kale oo la qoondeyay qaab kasta ha lahaadeene oo la xariira arrimaha keenay dhug-la’aanta, iyo sidoo kale la-qaybqaadashada xaq-gudidda isla arrimahaas hanashada shaqaalaha ama abaabulka.

Qararamada ku qoran qodobkan iyo qod. 44 waxa xitaa lagu dabbaqayaa wax soo saaraha mar-marka qaarkood.

**Qod. 48**

Shirkadaha loo oggladday shaqada caymiska liddigu waxyeellada dalka Soomaaliya oo laga mamnuucay in ay galaan heshiis iyo lifaaqyo warqadaha caymiska lagu cayminaya, kaaso dib u dhac u keenaya iyo isla halisyada, waxyabaha ku saabsan caymiska hadda socda, haddii aanu heshiisku dhicin sanadka u dambeeya ee jiritaanka warqadda caymiska. Reebitaankaas waxaa ku jira heshiisyada caymiska iyagoo ka madax bannaan jiritaanka warqadda caymiska socda ee la xariira isla haliysyada iyo mowduuca, oo dib u dhigaya muddada uu socdo wax ka badan sanad kale marka la galay heshiiska.

**Qod. 49**

Reebitaanka lagu soo sheegay qodoba sare, waxaa xitaa lagu fidi karaa caddaynta hal dhinac kuwa la caymiyay, waxaa loo xannibayaa urur-hantiyeedka muddo ka dheer hal sano, iyagoo ballan qaadayaa in ay heshiis galaan ama cusboonaysiiyaan gebi ahaan ama qayb ahaan caymiska isla halisyada iyo isla warqadda caymiska ka dib marka uu dhammaado muddada heshiiska socda.

**Qod. 50**

Xaafiiska Warshadaha, ganacsiga Gudaha iyo Shaqada ayaa gaar u leh iqtiyarka in ay bixiyaan oggolaasho gaara ee hore ee lagu galayo heshiisyo iyo ballanqaadyo dhinac keliya oo dib loo dhigo muddo ka badan hal sano, marka ay jiraan duruufo gaara oo saamaxaya, ee isla Xaafiiska, oo go’aan aan laga murmi Karin, uu wax ka baddali karo qodobada la soo sheegay.

**Qod. 51**

Hindesiyaasha, heshiisyada iyo caddaymaha ka horimaanaya reebitaanka/mamnuucidda waa waxba kama jiraan.

Baadilnimada waxaa lagu fidinayaa xitaa warqadda caymiska la diiday/baaqday ee la siiyay kuwa la caymiyay, oo ka qayb ka ah hesshiisyada iyo caddaymaha horay looga baaraandegay, markasta diidmada waa in ay ka timaaddo urur-hantiyeedka camiska wax ka hor sanadka ugu dambeeya inta uu socoto warqadda caymiska.

**Qod. 52**

Dadka u xilsaaraan hawlaha shirkadaha caymiska oo ku helay arrimaha caymiska heshiisyo, ballanqadyo hindisooyin ka horimaanaya reebitaanada lagu soo sheegay qodabada

sare waxaa lagu qaadi karaa ciqaab ganaax lacageed aan ka yareyn caddadka waxa ay ku heleen caymiska iyo abaalgudyada kale ee iyaga loo qoondeeyay qaab kasta ha ahaadeene, oo la xarrira arrimaha keenay jabinta sharciga.

**Qod. 53**

Ku xadgudubka qodobada sare lagu soo xusay ee ku saabsan dhaafidda/dhimista, ee la xariira jabinta iyo reebitaanka heshiisyada caymiska liddiga waxyeellada oo dib loo dhigay wax ka badan sanad, waxa baaraya xafiiska Warshadaha, Ganacsiga Gudaha iyo Shaqada kadib marka uu dhagaysto Guddiga ku xusan qod. 6 waana in ay ku jiraan:

a) magaca buuxa ee xadgudbaha;
b) tirinta/tixiddaa falka iyo xeerarka lagu xadgudbay;
c) warbixin kooban ee la xariirta sababaha falka iyo sharciga lagu saleeyay go’aanka;
d) taariikhda iyo saxiixa Madaxa Xaafiiska Warshadaha, Ganacsiga Gudaha iyo Shaqada.

**Qod. 54**

Qaraarka Madaxa Xaafiiska Warshadaha, Ganacsiga Gudaha iyo Shaqada waxaa cabasha looga qaadan karaa Maamulaha soddon cisho oo ka soo bilaabata taariikhda la gaarsiiyay iyadoo hubaal celinta helitaanka la xaqiijinayo. Go’aanka Maamulaha oo uu ku gaaro dekereto sabbaysan kama furna wax durida.

**Qod. 55**

Ururo-hantiyeedka Soomalida loo oggolaaday shaqada caymiska iyo sii cayminta nolosha iyo liddiga waxyeellada, waa in ay soo wargeliyaan Xaafiiska Warshadaha, Ganacsiga Gudaha iyo Shaqada magacyada kuwa wax caymiya oo bixinaya ama soo celinaya qayb ka mida halista ay qaabileen.

Isla waajibkaas wuxuu saaranyahay wakiilada ururi-hantiyeedka talayaaniga iyo kuwa dibadda ee loo oggolaaday shaqada caymiska iyo sii-cayminta Dalka, oo ku kooban halisyada ay isla Dalka ku galaan.

Marar gaara, xaafiiska Warshadaha, Ganacsiga Gudaha iyo Shaqada wuxuu reebi/mamnuuci karaa maaraynta halisyada sii-cayminta ama soo celi karaan ururo-hantiyeedka qaarkood oo aan Dalka ka samaysan wakaalad sharciya.

**Qod. 56**

Warqadaha caymiska oo ay bixiyaan ururo-hantiyeedka soomaalida ama ururo-hantiyeedka talyaaniga iyo kuwa dibadda oo soomaliya ku leh wakiillo sharci waa la baabi’in karaa marka uu soo codsado kan la-caymiyay, isagoo qaabka diiwaangelinta boostada soo celinta helitanka u maraya urur-hantiyeedka, haddii si joogta ah aan loo diiwangelin, maaraynta iyo aan lagala xisaabtamin xarunta ama wakiilka soomaalida, si loo go’aamiyo dammaanadaha xeerkanu jidaynayo. Markaaso kale ururo-hantiyeedka waa in ay soo celiyaan dhammaan abaalgudyadii la bixiyay.

**Qod. 57**

Heshiisyada caymiska oo ay galeen ururo-hantiyeed Dalka ka hawlgala ee ku xadgudba Amarkaan kuwaaso laga reebay in ay qabtaan arrimo cusub si waafaqsan qodo. 46 waa lakala dirayaa marka uu soo ashtakeeyo dhinaca kale ee heshiiska, marka ay mudda dhacdo qaybta koobaad ee abaalgudka ku xiga taariikhda reebitaanka iyo kuwa ku sii xiga, ashtakada waa in lagu wargeliyaa, warqad boosada laga diiwaangeliyay helitaankeeda, oo la gaarsiiyo urur-

hantiyeedka caymiska, ugu yaraan shan cisho ka kor dhicitaanka kaaso ah marka dhaqangalkiisu bilaabanayo.

**Qod. 58**

Waxaa lagu ganaaxayaa laba jibbaarka abaalgudka loo gooyay:

a) ururo-hantiyeedka ku hawlgala jabiya Amarkaan;
b) dallaalayda ku meelayay caymiska ururo-hantiyeedka lagu soo xusay xarfka a);
c) ururo-hantiyeedka bixiya halisyada sii-cayminta ee lagu soo rogay diidmada qod. 57;
d) heshisyada kuwa ku galay dalka dibaddiis caymisyo khuseeya hanti Dalka Soomaaliya

taalla, haddii aanay ahayn halisyo gaara ee ku yimid oggolaasho gaara ee Maamulaha. Ururo-hantiyeedka xilka gudan waayay waxay ka masuul yihiin, mid walba wakiilada iyo dallaaleyda kor lagu soo sheegay, bixinta ganaaxa la soo sheegay.

Ururo-hantiyeedka soomaalida, talyaaniga iyo kuwa dibadda ee laga xannibay in ay ka shaqeeyaan sida ku qoran Amarkaa, oo haddana iska sii wata in ay heshiisyo galaan, waxaa lagu dabbaqayaa isla ciqaabaha ku cad faqradda koobaad ee qodobka sare.

Haddii ay dhacdo soo noq-noqosha ganaaxu waa laba jibbaarmayaa.

**Qod. 59**

Maamulayaasha ururi-hantiyeedka soomaaliada ee caymiska, sii-cayminta, wakilada sharci ee talyaaniga iyo dibadda, agaasimayaasha aan u hoggaansamin ama aan dhammaan u hoggaansamin sida uu yahay qodobada Amarkaan waxaa lagu ciqaabayaa ganaax aan ka yareyn sh.som 100 (boqol) iyo aan ka badnayn 800 (siddeedboqol) xadgudub kasta.

**Qod. 60**

Oggolaashaha wax lagu qabanayo ee la siiyay ururo-hantiyeedka caymiska iyo sii-caminta dhaqangalkiisu wuxuu istaagayaa haddii urur-hantiyeedka aanu hawsha si wax ku-oola u bilaabin muddo sand ah oo ka bilaabata taariikhda la baahiyay dekereetda oggolaashaha. Sanadku marka uu dhammaado, urur-hantiyeedku ma bilaabi karo hawlaha haddii aanu heli oggolaasho cusub.

Dhicitaanka muddada oggolaashaha waxaa lagu soo saaraya dekereeto Maamulaha oo lagu baahiyo Faafinta Rasmiga ee Soomaaliya.

## CINWAANKA 8AAD
## Qaraarada kalaguurka iyo gunanadka

**Qod. 61**

Ururo-hantiyeedka caymiska iyo sii-caymnta ee ka hawlgala dalka marka uu dhaqangalo Amarkaan waxay u fasaxanyihiin in ay howlahooda sii wataan, hasayeeshe sanad gudahiis ee isla taariikhdaas waa in ay waafajiyaan xeerarka idil ee ku jira Amarka isaga. Wixii intaas aan ahayn waa in ay u diyaargarooban xaq-gudid ama waxaa lagu gelinayaa xaq-gudidda qaraar uu soo saaro Maamulaha marka uu dhagaysto guddiga ku xusan qod. 6.

**Qod. 62**

Maamulaha wuxuu dekereeto ku soo saarayaa xeer lagu dhammaystirayo Amarkaan.

Waxaa hubiyay: Maamulaha

**E. Martino**